# Kaamirooyinka Ku rakiban goobaha adeegyada HCBS

Sida uu dhigayo Xeerka Ugu Dambeeya ee Goobaha Adeegyada Guriga iyo Bulshada lagu bixiyo (HCBS), dawlad-goboleedyadu waa inay hubiyaan xuquuqda shakhsiyaadka ee ku saabsan qarsoodiga, sharafka, iyo ixtiraamka dhammaan goobaha adeegyada HCBS. Isticmaalka kaamirooyinka waa in la qiimeeyaa si loo hubiyo waafaqsanaanta Xeerka Ugu Dambeeya ee Goobaha HCBS iyo siyaasadaha Waaxda Naafonimada Horumarineed (DDD) ee la xiriira xuquuqda ka-qaybgalayaasha.

Marka aadan hubin in lagu isticmaali karo kaamirooyinka goobtaada adeegyada HCBS, fadlan la xiriir Isu-duwaha Adeegga (SC) ee ka-qaybgalaha.

## Shuruudaha Guud

A. Kaamirooyinka waxaa lagu isticmaali karaa meelaha aan qofku aanu ka filaynin qarsoodi buuxda sida bannaanka guriga xafiiska shaqaalaha ama meelaha fagaare ah ee goobaha adeegyada maalinta taasna looma arko xadgudub xuquuqeed waana waafaqsan tahay Xeerka Ugu Dambeeya ee Goobaha HCBS.

B. U isticmaalka kaamirooyinka si loo bixiyo taageero aragtida fog ama mid humaag ah looma arko xadgudub xuquuqeed waana waafaqsan yahay Xeerka Ugu Dambeeya ee Goobaha HCBS haddii kaamirooyinka lagu isticmaalo ogolaanshaha ka qaybgalaha iyo kor u qaadista madax bannaanidiisa.

1. Ka faaidaystaha adeega waa inuu **isagu doortaa** in gurigiisa lagu rakibo kaamirooyin. Doorashadan waa in lagu qoro Qorshahooda Ku Salaysan Qofka (PCP) waxaana waajib ku ah bixiyaha adeegga inuu yeesho qorshe iyo/ama siyaasad lagu xaqiijinayo xuquuqda ka qaybgalaha ee qarsoodiga sharafka iyo ixtiraamka.
    a. Marka ka faaidaystuhu aanu awoodin inuu ogolaado isticmaalka kaamirooyinka, kaamirooyin looma adeegsan in loogu taageero qaab muqaal aragti fog ah.
    b. Ka faaidaystaha adeegu wuu beddeli karaa fikirkiisa ku ah in lagu isticmaalo kaamirooyinka goobta adeegga wakhti kasta.
2. Isticmaalka kaamirooyinka sida in ay ka qaybqaadataan taageerida aragtida fog waa inay ahaataa:
    a. Mid ku salaysan adeegga la bixinayo oo fududeeyaa ku dhex milanka bulshada halkii uu khatar uga noqon lahaa in adeeggu ka go'doomiya ka qaybgalaha bulshada ama xiriirka dadka kale.
    b. Kaliya mid lagu ogolaado xaaladaha aan caafimaadka iyo badbaadada ka qaybgalaha khatar ugu jirin.
    c. Mid si cad loogu qoro PCP iyadoo lagu muujinayo sida adeegga iyo taageerada looga hubinayo buuxinta baahiyaha ka qaybgalaha.

C. Ku isticmaalida kaamirada goobaha uu ka faaidaystuhu uu kafilaanayo in ay u tahay meelo asturnaan, sida meelaha nolol-wadaagga ee gurigooda, looma oggola ilaa oggolaansho kale laga helo ka qaybgalaha, Kooxda Qorshaha Ku Salaysan Qofka (PCP), iyo Guddiga Dib-u-Eegista Xuquuqda Aadanaha iyo Sharciga ee bixiyaha (HLRC)

1. Kaamirooyinka/kormeerayaasha fiidiyowga lagama oggola qolalka hurdada iyo musqulaha.
2. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xaddidaadaha xuquuqda waxaa laga heli karaa:
    a. Cutubka 3 ee Buugga Siyaasadda Bixiyayaasha DD HCBS;
    b. Shaxda socodka ee lagu go'aaminayo xaddidaanta daawooyinka maskaxda saameeya;
    c. Shaxda socodka ee lagu go'aaminayo xaddidaanta faragelinta aan-daawo ahayn;
    d. Khayraadka Xuquuqda iyo Xaddidaadaha

e. Tusaalooyinka Xuquuqda iyo Xaddidaadaha

## Shuruudaha Adeeg-Bixiyaha

Marka isticmaalka kaamirooyinka uu waafaqsan yahay Xeerka Ugu Dambeeya ee Goobaha HCBS iyo shuruudaha ay soo sheegtay DDD, bixiyeyaashu waa inay sidoo kale buuxiyaan shuruudaha soo socda.

A. Bixiyaha adeegga ayaa mas'uul ka ah hubinta in kaamirooyinka la isticmaalo ay waafaqsan yihiin Xeerka Ilaalinta iyo La-wareegidda Caymiska Caafimaadka (HIPAA) iyo Xeerka Tiknoolajiyadda Macluumaadka Caafimaadka ee Dhaqaale iyo Caafimaad (HITECH Act).

B. Kaamirooyinka lama isticmaali karo si loogu kormeero ama loogu daba socdo shakhsiyaadka, si loogu fududeeyo shaqaalaha, ama in lagu beddelo shaqaalaha laftiisa.

C. Marka kaamirooyinka la isticmaalayo, bixiyuhu waa inuu:

1. Ku dhejiyaa calaamado cad oo ka muuqta goobta, kuwaas oo muujinaya in la adeegsanayo tignoolajiyada muuqaal iyo/ama maqal ujeeddo kormeer ama duubis awgeed; iyo
2. Ka hor inta aan kaamirooyinka la adeegsan, yeeshaa siyaasado iyo habraacyo lagu qaybiyey oo daboolaya qodobadan:
    a. Goobta ay ku yaalliin dhammaan kaamirooyinka kormeerka;
    b. Sida duubisyada loo sugi doono oo loo kaydin doono ilaa laga tuuro ama la burburiyo;
    c. Habka lagu hubinayo in duubisyada si ammaan ah loo tuuro ama loo burburiyo ka dib muddo macquul ah; iyo
    d. Cidda heli doonta qalabka iyo duubisyada la sameeyay.

## Helitaanka Ogolaansho

A. Foomka ogolaanshuhu wuxuu ku jiri karaa heshiiska degganaha ama wuxuu noqon karaa foom gooni ah.

B. Ogolaanshuhu waa inuu ka koobnaadaa qodobadan:

1. Goobta ay ku yaalliin dhammaan kaamirooyinka;
2. Sababaha ay u socoto kormeerka/duubistu;
3. Goorta la sii dayn karo duubisyada maqal/muuqaal iyo ujeeddooyinka loo adeegsan karo;
4. Qoraal sheegaya in kaliya shaqaalaha ku habboon ay heli karaan qalabka iyo duubisyada; iyo
5. Muddada la heenayo duubisyada maqal/muuqaal.